



Mashruuca Hagaha Waalidka ee Ohio



Hagayaasha Waalidka waxa loo tabobaray inay caawimo bixiyaan

Waxaanu nahay hagayaal, iskaashadayaal, iyo tan ugu muhiimsan oo ah, in xaaladdayadu isku mid tahay.

Hagayaasha Waalidka Ohio waa waalidiinta carruurta qaba naafooyinka kuwaasi bixiya taageero dadka xaaladda isku mid ah ku jiraa isa siiyaan oo ay siiyaan qoysaska kale ee haysta carruur naafooyin qaba oo Ohio deggan. Waxaanu isticmaalnaa waayo-aragnimo shaahid ah si aanu ula shaqayno saraakiisha dugsiyada uguna hagno qoysaska inay kordhiyaan guulaysiga waxbarasho ee ardayda hela adeegyada waxbarashada gaarka ah.

Waxaanu ka caawinnaa qoysaska inay mushaaxaan hannaanyada iyo adeegyada waxbarashada gaarka ah ee deegaanka iyo gobolka si markaa carruurta qaba naafooyinku ay uga faa'idaysan karaan sida ugu badan waayo-aragnimadooda waxbarasho.

Wadajir, ayaynu uga caawin karnaa ardaydeena qaba baahiyaha gaarka ah inay helaan dareenka gaarka ha ee ay u qalmaan kuna dhacaan jidkooda guulaysiga waxbarasho.

Helitaanka xalal sida ugu fiican u anfacaya carruurta

Hagayaasha Waalidka Ohio waxay la shaqeeyaan qoysaska, dugsiyada iyo hay'adaha. Markay taageeradayada helaan, qoysasku waxay fahmi doonaan hannaanka waxbarashada gaarka ah waxayna u noqon u-doodayaal fiican carruurtooda.

Waxaanu isticmaalnaa xamaasadda iyo waayo-aragnimadayada si aanu u abuurno iskaashi xooggan si aanu uga dhigno macluumaadka iyo hannaanyada waxbarashada gaarka ah qaar si fudud loo heli karo. Hagayaasha Waalidka Ohio wuxuu qoysaska siiyaa macluumaad ku saabsan mawduucyo waxbarashada gaarka ah oo kala duwan. Gaar ahaan, waxaanu u bixinaa macluumaadka iyo taageerada si aanu uga kaalmayno:

- Fahmida xuquuqda iyo waajibaadka qoysaska, ardayda iyo dugsiyada.
- Ka gudbidda dugsiyada xannaanada iyo dugsiyada sare.
- Gacan-ka-gaysiga kordhinta guulaysiga ardayda, sida qorista iyo akhriska.
- Hagitaanka qoysaska ee kulan kasta oo waxbarashada gaarka ah lagaga hadlayo marka uu qoyska ama degmadu codsato.
- Martigalinta kulamada is-xog-waraysiga ee dugsiyada iyo qoysaska.
- Ku xirista qoysaska iyo barayaasha hay'adaha iyo ururada taageera ardayda naafooyinka leh.

Sidoo kale, tabobarkayagu wuxuu naga caawiyaa inaanu bixino macluumaadka wakhtigan iyo kan la cusboonaysiiyey ee ku saabsan shuruudka iyo siyaasadaha waxbarashada gaarka ah.

Taageeradayadu waa soo jireen

Muddo ka badan 30 sano, Hagayaasha Waalidka Ohio waxay ka caawinayeen qoysaska inay mushaaxaan hannaanyada iyo adeegyada waxbarashada gaarka ah si markaa carruurta qabta naafooyinku uga faa'idaan sida ugu badan waayo-aragnimadooda waxbarasho.

Hagayaasha Waalidka Ohio waxa laga maalgaliyaa lacagta fedaraalka iyo gobolka iyadoo loo marayo Waaxda Ohio ee Waxbarashada. Waxaa na shaqaalaysiiya degmo dugsiyeedyada iyo xarumaha adeegga waxbarasho. Xafiiska Carruurta Goonida ah ee Waaxda Ohio ee Waxbarashadu waxay na siisaa hagitaan iyo taageero marka aanu qabanayno shaqadayada haddaanu nahay Hagayaasha Waalidka. Xarunta Waxbarashada iyo Tababarka ee Shaqaalayaanta ee Jaamacadda Gobolka Ohio waxay na siisaa kormeerid, kobcin xirfadeed, kaalmo khayraadka iyo farsamada ah.

Ma waxaad tahay xubin ka tirsan qoys haysta ilme naafo ah oo jeclaan lahaa inay helaan taageeradayada? Heegan ayaanu u nahay caawimadaada!

Si aad u Hesho Macluumaad Dheeraad ah

Office for Exceptional Children
Ohio Department of Education
4th Floor, Mail Stop 409
25 S. Front Street, Columbus, OH 43215
(877) 644-6338
www.education.ohio.gov
ParentMentors@education.ohio.gov

Barnaamijka Kormeerka & Kobicinta
Xirfadeed ee Hagaha Waalidka Ohio
Jaamcadda Gobolka Ohio
Xarunta Waxbarashada iyo Tababarka ee
Shaqaalayaanta (Center on Education and
Training for Employment, CETE)
Kooxda Sinnaanta, Kaqaybgalka,
iyo Qiimaynta (614) 292-3000
Parentmentor.osu.edu
CETE-ParentMentor@osu.edu

Twitter: @ParentMentorsOh
Facebook: @OhioParentMentorProject

